



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Information, Culture & Tourism
Office of the Minister

Date: 15/04/2020

War-saxaafadeed

Beryahan dambe waxay dadka sida dhaqanka xun u isticmaala baraha bulshada si khaldan u fasirayeen warqad aan Official ahayn (wax saxeex iyo tiimbare ah toona lahayn) oo ruux shaqaale ahi si khaldan u faafiyey, laakiin uu isla markii saxay Agaasimaha Televisionka Qaranka oo doonayey in TVga Qaranka loo shaqaaleysiiyo laba gabdhood oo Soomaaliyeed oo xirfad ama hibo Warbaahineed leh, inkasta oo markii dambe la joojiyey.

Warqadaas aan Official-ka aheyn ee sida khaldadka uu u faafiyey ruux shaqaale ahi waxaa markiiba saxay, cudurdaarna ka bixiyey Agaasimaha TVga Qaranka, sidoo kale Agaasimaha Guud wuxuu talaabo ka qaaday ruuxii shaqaalaha ahaa ee sida khaldan u faafiyey.

Warqadahaas baxay ma jirin mid ka baxday Xafiiska Wasiirka, kumana lug lahayn qof ka tirsan Xafiiskiisa ama Wasiirka laftiisu, hase yeeshee sida muuqata waxaa ka dhigtay dacaayad Wasiirka lagu eedeeyo ama lagu cambaareeyo dad si siyaasadaysan ama si cuqdadaysan wax uga tabanayey Wasiir oo u isticmaalay dadka ku shaqeysta ee ujrada ku qaata dacaadaha lagu faafiyo Warbaahinta Bulshada.

Wasiirku oo mudo badan si daacad iyo wadaniyadi ku jirto ugu soo shaqeynayey dalkiisa, Waa Aabbe gabdho dhalay ayna la dhasheen. Ku dhegan oo uu la weyn yahay dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed iyo Diinteena munasilka ah oo aan marna u quudhin gabdhaha Soomaaliyeed wax xun. Sidoo kalena Wasaaradda Warfaafintu, dhaqanka iyo Dalxiisku waxay u taagan tahay korinta iyo baahinta sharafka, karaamada iyo dhaqanka suuban ee ummadda Soomaaliyeed.

Sidaas awgeed, waxaanu shacabka Soomaaliyeed la socodsiinaynaa in daacayahaas ka dhanka ah Wasiirka iyo Wasaaradda aanay ahayn wax sal iyo raad leh.

End

